



Seattle

Balaarinta Wadada Tareenka ee Korontada ku shaqaysa ee Sound Transit


Abuurista Bulshooyin isku Xiran

Sound Transit waxay dhisaysaa 14 xarumood oo tareenka korontada ku shaqeeya ah oo adeeg siinaaya Galbeedka Seattle sanadka 2032* iyo Ballard sanadka 2037-2039*. Wadooyinka cusub ee tareenka korontada ku shaqeeya iyo kalaanada taraasidka ee dhulka hoos tiisa ee Bartamaha magaalada, South Lake Union, iyo Seattle Center/Uptown ayaa ah maalgalinta dhanka marinka ee ugu balaaran oo laga sameeyo intay jirtay Magaaladu.

**Hadii aad rabtid faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan taariikhaha mashruuca, fadlan eeg wabsaydhka Sound Transit (Ingiriisi: bit.ly/3Bq6VYQ)*

Aan qorshe wadajir ah samayno

- Adeegga cusub ee tareenka korontada ku shaqeeya oo xaafadaada loo samaynaayo ayaa kusiinaaya dookh yar oo la isku halayn karo oo aad ku tagto meesha aad rabto inaad tagto.
- Guryaha qiimaha jaban iyo ganacsiyada ku yaala aaga xarumaha ayaa abuuri kara bulsho isku dhafan oo leh meelo badan oo ay ku noolaadaan, ka shaqeeyaan, ayna ka dukaamaystaan.
- Yaraynta ku tiirsanaanteena gaariyaasha iyo siinta dadka deegaanka doorasho awoodeed oo dhab ah, qeexan oo ku aadan gaadiidka ayaa naga caawinaysa inaad dagaal la galno isbadalka cimilada.
- Sinaanta isirka iyo cadaalada bulshada ayaa aasaas u ah go'aan gaarista magaalada ee ku aadan xarumaha la dhisaayo.



Magaallada Seattle iyo Sound Transit waxay la shaqaynayaan bulshooyinka. Waa tan qaabka ay ula shaqaynayaan:



City of Seattle DOORKA



Duqa magaalada Jenny Durkan iyo Xubin ka tirsan aqalka wakiilada Debora Juarez ayaa ka shiray gudigga Sound Transit ee gaari doona go'aanada kama danbaysta ah.



Inay qorsheeyaan guriyeynta, ganacsiyada, iyo goobaha banaan si xaafado cajiib ah looga furo aaga xarumaha cusub.



Inay so saaraan ogolaansho loo siinaayo Sound Transit inay dhisto xarumaha iyo jidadka.



SOUNDTRANSIT DOORKA



Inay qiimeeyaan sida la isku waafajin karo iyo goobaha laga dhisaayo xarumaha.



Inay sii diyaarshaan qorshaynta, dib u eegista bii'ada iyo naqshada hanaanka wadada tareenka korontada ku shaqeeya.




Inay dhisaan ayna maamulaan nidaam cusub oo tareenka korontada ku shaqeeya ah.

Xog dheeri ah ka fiiri barta seattle.gov/lightrail

Updated February 2022 (Somali)

Waqtiga



Maaliyad dheerad ah ayaa Loo baahan Karaa

Dhisida wadooyinka tareenka korontada ku shaqeeya oo laga dhisaayo xaafada dadku ku badan yahay ayaa ah shaqo ballaaran. Magaaladu waxay doonaysaa inay ka caawiso Sound Transit dhisida nidaamka tareenka korontada ku shaqeeya kaasoo u adeegaaya jiilalka soo socda. Waxaa jiro go'aano waawayn oo ay tahay in laga gaaro goobaha xarumaha laga dhisaayo iyo sida la iskugu aadinaayo. Sound Transit iyo Magaaladu waxay kala shaqayn doonaan bulshada sidii looga baaran degi lahaa kala hufida iyo dulmarka dookhyada kala duwan ee lagu samayn karo hanaan hormarsan.

Muddada soo socota: Qorshaynta Xarumaha

Kadib marka Sound Transit ay aqoonsato goobaha kama danbaysta ah ee laga dhisaayo xarumaha, Magaallada Seattle ayaa kala shaqayn doonta bulshooyinka sidii:

- Loo qorshayn lahaa hormaro lagu sameeyo hormarinta goobaha socodka, baaskiilka, iyo baska si lagaaga caawiyo inaad gaarto goobaha tareenka laga raacaayo.
- Aqoonsiga fursadaha dhanka guriyaynta, dukaamo, iyo goobaha banaan si loo abuuro xaafado raqiis ah, oo lagu noolaan karo oo laga abuuro aaga xarumaha tareenka.
- Sidii loo abuuri lahaa muhimadaha u dagan sidii loo soo gudbin lahaa oggolaanshaha mashruuca.

Magaallada ayaa tixgelin gaar ah siin doonta saamaynada mashruucu ku leeyahay dadka aan caddaanka ahayn ee xaafadahoodu qaadaan culayska mashriicda waawayn ee gaabayaasha dhaqaalaha.



Lasoco Mashruuca

Wax ka ogoow kulanada soo socda ee bulshada ay la yeelanayso Magaalada iskana qor si aad u hesho xogta ugu danbaysa barta: seattle.gov/lightrail.

Si aad u hesho xogihii ugu danbeeyay ee mashruuca Sound Transit, booqo barta: soundtransit.org/wsblink.

Meelaha Lagala Xariiraayo magaalada Seattle



Vera Giampietro, Qorshaynta
Office of Planning & Community Development
206.684.0431 | vera.giampietro@seattle.gov

Jessica Brand, Wada shaqaynta
Department of Neighborhoods
206.386.9982 | jessica.brand@seattle.gov

Sara Maxana, Gaadiidka
Seattle Department of Transportation
206.233.3369 | sara.maxana@seattle.gov

Xog dheeri ah ka fiiri bart seattle.gov/lightrail

Magaalada Seattle waxay ku boorinaysaa qof kasta inuu ka qaybgalo barnaamijyadeeda iyo shaqooyinkeeda. Si aad u hesho caawimaadaha, agabka naafada, macluumaadka oo ku qoran qaabab kale, ama xogta helitaanka, la xariirw
Jessica Brand | 206.386.9982 | jessica.brand@seattle.gov sida ugu dhakhsaha badan ee aad fursad ugu hesho.